

Mas'uuliyadda Aad Ku Bixinayso Kharashka Daryeelka ee Xarumta Baxnaaninta ee Degaanka ah Your Responsibility to Pay Towards Costs of Care at the Residential Habilitation Center

Ku:

Ka:

Qof cusub oo deggan Xarunta Baxnaaninta Degaanka ah (RHC) ahaan, qaybna ka mid ah Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS), waxaad heli kartaa ogeysiis sheegaya in aad mas'uul ka tahay bixinta qayb ka mid ah daryeelkaaga. Kani waxaa loo yaqaanaa Ogeysiiska Oggaanshaha Mas'uuliyadda (NFR) waxa lagaa rabanna waxaa la yiraahdaa ka-qaybgal. NFR waxaa marka hore kuu soo diri doonna Xafiiska Adeegyada Bulshada (CSO) iyo marka uu ka-qaybgalkaaga isbeddelo.

Marka kheyraadyadaadu maaliyadeed iyo kharashaadkaaguba ay isbeddelaan waxay saameyn doonnaan qaddarka ka-qaybgalka ee lagaa rabo. Xafiiska Adeegyada Bulshada (CSO) ayaa ku soo ogeysiinaya marka qaddarkaaga ka-qaybgalka uu isbeddelo.

Waxaa jira saddex hay'adood oo ku lug leh maareynta qaybta maaliyadda ee joogitaankaaga ee xarunta RHC.

- 1) RHC waxay bixin doontaa adeegyo iyo taageero inta aad deggan tahay. Waxay sidoo kale noqon doonnaan hayaha koowaad ee diiwaannadaada maaliyadeed ee maalinlaha ah.
- 2) Xafiiska Adeegyada Bulshada (CSO) ayaa wuxuu go'aamin doonnaa xaq-u-yeelashadaada maaliyadeed wuxuunna go'aamin doonnaa waajibaadkaaga ka-qaybgalka.
- 3) Xafiiska Dib-u-soo-celinta Maaliyadaha (OFR) wuxuu mas'uul ka yahay in uu qaado qaddarka ka-qaybgalkaaga wuxuunna haynayaa dhammaan diiwaanka waxqabadyada macaamulka akoonkaaga. Bayaanka ayaa waxaa boostada si bille ah kuugu soo diraya OFR.

DSHS waxay ku weyddiin doontaa macluumaad ku saabsan dakhligaaga iyo kharashkaaga iyada oo lagu saleynayo macluumaadkan ayaa Xafiiska Adeegyada Bulshada (CSO) wuxuu sheegi doonnaa qaddarka lagaa rabo in aad ka-qaybgal ahaan u bixiso. Ka-qaybgalka waa qaddarka lagugu leeyahay bil kasta ee loogu talagalay kharashka daryeelkaaga ee xarunta RHC. Ogeysiiskaaga Oggaanshaha Mas'uuliyadda ayaa lagu soo diri doonnaa isaga oo la socda Ogeysiiskeenna Ka-qaybgalka. Ogeysiiskaaga Ka-qaybgalka waxaa ka mid noqon doonna qaddarka lagaa rabo iyo cinwaanka aad lacag-bixintaada ku direyso. Waxaad heli doontaa bayaanka qaansheegga bilaha oo ay la socoto baqshadda lagu soo celinayo iyo kuuboon. Kuuboonka ayaa loo baahan yahay in lagu soo daro lacag-bixintaada. Haddii aad leedahay wakiil sharci ah wuxuu mas'uul ka noqon doonnaa bixinta macluumaadka la codsadey si ka-qaybgalkaaga loo xisaabiyo.

Xafiiska Adeegyada Bulshada (CSO) ee DSHS wuxuu xisaabinayaa waajibaadkaaga iyada oo la raacayo xeerka WAC 388-513-1380 qaddarkaasna waxaa lagu xisaabinayaa warqadooda. Xafiiska CSO wuxuu go'aamin doonnaa kharashkaaga ka-qaybgalka oo lagu saleynayo baaritaanka kuwan soo socda:

- Dakhliga iyo mushaaraadka, oo uu ku jiro Dakhliga Damaannada Dheeraadka ah (SSI)
- Kheyraadyada ka badan xadka \$2,000, oo uu ku jiro iibka ama wareejinta hantida
- Canshuuraha gobolka iyo/ama federaalka
- Ujuurrooyinka ay maxkamadda amarto ee aad siiso mas'uulkaaga sharciga ah
- Taakulaynta xaaska
- Taakulaynta carruurta ama kharashka masruufka qoyska
- Kharashaadka caafimaadka oo uu ku jiro isbeddelada lacagta joogtada ah ee caymiska caafimaadka
- Kharashka dayactirka guriga ee bulshada, ee waafaqsan duruufaha qaarkood

Mas'uuliyadda aad ku bixinayso kharashka daryeelkaaga waxaa lagu sheegay xeerarka RCW 43.20B.430, 43.20B.435, iyo WAC 388-835-0940. Haddii aad ku guuldareysato in aad deynaan bixiso, waaxda waxay adiga kaa qaadi kartaa tallaabo ka qaadis dheeraad ah. Haddii aadan oggolaan waxyaabaha la oggaadey waxaa lagu siin doonnaa fursad aad ku codsaneyso dhageysi maamul.

Marka aan hoos saxiixo waxaan caddeynayaa in aan helay oo aan akhriyey dokumentigan:

MACMILKA / WAKIILKA SHARCIGA AH

TAARIIKHDA

Instructions

When is this form used?

The form is to be used when a new client is admitted as a long term stay client to a Residential Habilitation Center.

Who must receive this form?

This form is intended to be handed out to the client and/or the client's representative during admission to the RHC. If the client representative is not present at admission the form should be mailed to them requesting return.

Who is responsible to ensure this form is received?

The admissions coordinator will give the form out as part of this admissions package. They will ask the client and/or representative to read and sign the form, keep the original, and give a copy back to the representative.